



SHARCIYADA MAAMULKA OREGON  
MAAMULKA CAAFIMAADKA OREGON, WAAXDA CAAFIMAADKA DADWEYNAHA  
SADARIKA 333

WAAXDA 19

BAARITAANKA IYO XAKAMEYNTA CUDURADA: AWOODAHA GUUD IYO  
MASUULIYADAAHA

**333-019-1025**

**Sharuudaha Maaskaraha oo Boosaska Gudaha iyo Banaanka**

(1)(a) Muhiim ayay u tahay xaaladaan ee shaqsiyaadka xirtaan maaskaro ama waji daboolasho markii ay joogaan boosaska dadweynaha gudaha iyo banaanka oo ay joogaan dadka ka imaanayo qoysaska kale. COVID-19 wuxuu maraa isbadelo soo noqnoqdo isaga oo koobiyeysmayo, taas oo waqti kadib sababo noocyada aadka u faafi karo, wuxuu sababaa cudur aad u daran, ama lahaado muuqaalo kale ee walaaca caafimaadka dadweynaha sida waxtarada tallaalka oo hoos u dhaca. Laga bilaabo waqtiga sharcigaan ayaa la soo saaray, Delta wuxuu ahaa nooc ka sameysan wax ka badan boqolkiiba 98 ee muunooyinka isku xiggo ee Oregon. Nooca Delta ayaa qiyaastii labo illaa sadex jeer aad waxku ool uga ah noocyada nooca daran ee COVID-19. Waxaa jiro cadeyn ka imaaneyso dadka qabo nooca Delta oo inay qabaan isla qaababka fayraska iyada oo aan laga eegin heerka tallaalka ee soo jeedinayo in xittaa dacwadaha sii badanayo ee tallaalka ayaa u gudbin karo noocan si wax ku ool ah.

(b) Caabuqa COVID-19 ayaa inta badan lagu kala qaadaa neefsiga dhibaca neefsashada ee soo baxda markii ay dadka qufacaan, hindhisaan, heesaan, hadlaan, ama neefsadaan. Daraasado ayaa muujineyso in maaskarooyinka iyo waji daboolashada inay ka xirto ku siideynta dhibcaha neefsashada deegaanka oo ay sidoo kale yareyn karta gaarista dhibcaha ee qofka xiran maaskaro. Walxaha fayraska COVID-19 wuxuu ku faafaa dadka dhexdooda si aad u diyaarsan gudaha iyo markii ay dadka usu dhowaadaan waqti muddooyin dheer ee gudaha iyo banaanka. Shaqsiyaadka qaaday nooca Delta waxay leeyihiin walxaha fayrsaska badan ee mareenada neefsashada oo wuxuu ku gudbi karaa fayrsaska si aad u sahlan dadka agagaarkooda ah. Waxaa jiro tusaalooyinka kordhaya meesha gudbinta ay ka dhacdo goobaha dadka badan ee banaanka, xittaa inkastoo halista gudbinta goobahaan ay u badantahay inay ka hooseyso gudaha.

(c) Sharcigaan wuxuu muhiim u yahay caawinta xakameynta COVID-19, yareynta isbitaal geynada iyo dhimashooyinka, oo waxay siiyaan illaalada caafimaadka guud dadka ku nool Oregon.

(2) Ma jiraan wax ku jiro sharcigaan oo loogu talloagalay inuu:

(a) Ka mamnuuc shaqsiga ama qofka inuu u hogaansamo sharuuda maaskaraha aadka u xadeysan.

(b) Mamnuuc qofka, oo ay ku jiraan ganacsiga ama shirkada dowlada inay isticmaalaan sharuudaha aadka u xadeysan.

(3) Wixii ujeedooyinka sharcigaan, qeexitaanada xiggo ayay quseysaa:

(a) "Ganacsiga" waxaa ku jiro shaqsiga, ururka ama hay'ada ku lugleh ganacsiga, warshadaha, howlaha xirfadlaha aan faa'ido doonka aheyn.

(b) "Boos caadi ah ama la wadaago" waxaa loola jeedaa aaga meesha shaqsiyaadka ay dhaxgeli karaan musqulaha, qolka nasiinyada, wadada hoolka, wiishka, albaabka, fasalka, qolka weyn oo leh xafiisyada go'an, qolalka kulanka, qolalka shirka iyo aag walba ee u furan dadweynaha.

- (c) "Waji daboolashada" waxaa loola jeedaa dhar, bacaha, warqada ama waji daboolashada kale ee daboolaa sanko iyo afka oo si dhuuqsan ugu fadhiisto sanko korkiisa, afka ka hooseeyo, iyo dhinacyada wajiga.
- (d) "Daboolka wajiga" waxaa loola jeeda daboolka caaga ah ee daboolka wajiga hore, gaaro hoosta garka, oo ku daboolo agagaarka dhinacyada wajiga.
- (e) "Qoyska" waxaa loola jeedaa shaqsiyaadka ku wada nool hal deegaan.
- (f) "Boosaska gudaha" waxaa loola jeedaa meel walba ee gudaha, oo ay ku jiraan laakin kuma xadidno goobaha shaqada dadweynaha ama gaarka ah, ganacsiyada, aagaga gudaha waxay u furanyihiin dadweynaha, gelitaanada dhismaha, boosaska caadiga ah ama la wadaago, fasalada, wiishashka, musqulaha, adeegyada gaadiidka iyo booska kaloo gudaha meesha dadka ay isugu imaan karaan ujeedo walba. Booska gudaha kuma jiro deegaanka gaarka ah ama baabuurka gaarka ah oo loo isticmaalo isticmaalka gaarka ah oo aan loo isticmaalin adeegyada gaari wadaagida.
- (g) "Maaskaraha" waxaa loola jeedaa maaskaraha heerka caafimaadka.
- (h) "Diyaariyaha dhacdada ama usu imaanshaha " waa qof ama hay'ad dowladeed ee diyaariso, fududeyso, ama masuulka ka ah dhacdada ama usu imaanshaha.
- (i) "Booska banaanka " waxaa loola jeedaa meel walba ee banaanaaha meesha dadka ka imaanayo qoysaska gooniga ah ay isugu imaan karaan ujeedo walba, oo ay ku jiraan laakin kuma xadidno goobaha shaqada dadweynaha ama gaarka ah, boosaska la wadaago ama caadiga ah, ciyaaraha banaanka, goobaha, darjiimada, iyo dusha sare ee saqafka. Booska banaanka kuma jirto aagaga banaanka ee ka qeybta ah deegaanka gaarka ah ama xerrooyinka aan hoy la'aanta ah.
- (j) "Qofka masuulka ka ah booska gudaha" waxaa loola jeedaa qof walba ama hay'ada dowlada ee masuulka ka ah howlaha booska gudaha.
- (k) "Qofka masuulka ka ah booska banaanka" waxaa loola jeedaa qof walba ama hay'ada dowlada ee masuulka ka ah howlaha booska gudaha.
- (l) "Booska shaqada shaqsiga gaarka ah" waxaa loola jeedaa booska gudaha ee ku yaalo goobta shaqada dadweynaha ama gaarka ah oo ay u isticmaalaan shaqada hal shaqsi waqtigiiba ee ku lifaaqan dhammaan dhinacyada leh darbiyada ee dhulka illaa saqafka ee leh albaabada xiran.
- (m) "Goobaha shaqada dadweynaha iyo gaarka ah" waxaa loola jeedaa meelaha gudaha iyo banaanka meeshaas oo ay dadka ka shaqeeyaan, oo ay ku jiraan laakin kuma xadidno ganacsiyada, bangiyada, warshadaha sameeya cuntada, xarumaha wax soo saarka, goobaha dhismaha, baqaarada ama beeraha.
- (n) "Gaadiidka dadweynaha" waxaa loola jeedaa qaab walba oo gaadiidka u furan dadweynaha oo ay ku jiraan laakin kuma xadidno tareenada, basaska, tarooliyada, baabuurta wadada, caasiyada, basaska dugsigi, diyaaradaha, doomanka, adeegyada gaadiidka la wadaago. Gaadiidka dadweynaha kuma jiraan baabuurta gaarka ah illaamaa gaariga gaarka ah loo isticmaalo gaadiid bulsho sida adeegyada gaadiid wadaagida.
- (o) "Adeegyada gaadiidka la wadaago" waxaa loola jeeda adeegyada gaadiidka, ha ahaado dadweynaha ama gaarka ah, meeshaas oo darawalka ku qaado baabuur shaqsi ama koox dad ah oo ku dalaco qidmooyin ama biilal adeegyada ah. Adeegyada la wada wadaagayo waxa kamid ah, laakin aan kuma xadidno, gawarida tagsiga, Uberka iyo Lyft.
- (p) "Xarunta gaadiidka" waxaa loola jeedaa garoonka, boosteejada baska, dakadaha doomanka, dakadaha badda ama dakadaha kale, boosteejada tareenka dhulka (oo ay ku jiraan xarun walboo go'an oo rikaabka laga qaado ama lagu dajiyoo), boosteejada tareenka, dakada laga soo galo Mareykanka, goob kale ee ku bixisaa adeega gaadiidka sida waafaqsan sharciga Mareykanka ah.
- (4) Shaqsiyaadka, aan laga geein heerka tallaalka, ayaa looga baahanyahay inay xirtaan maaskaro, waji daboolashada ama daboolka wajiga marka laga reebo sida looga dhaafay qeybta (5) ama (6) ee sharcigaan markii:
- (a) Booska gudaha; iyo
- (b) Booska banaanka haddii shaqsiyaadka aanan ama aysan si iswaafaqsan u joogteynin ugu yaraan lix fiit ka fogaansho ah shaqsiyaadka aanan joogin qoyskooda.
- (5) Maaskaraha, waji daboolashada, ama daboolka wajiga looma baahno markii shaqsiga:

- (a) Uu ka hooseeyo shan sanno jir ama aanan weli la geyn dugsiga barbaarinta; illaamaa shaqsiga uu isticmaalayo gaadiidka dadweynaha ama xarumaha gaadiidka taas oo shaqsiga ka hooseeyo labo sanno aan looga baahneyn inay xirtaan maaskaraha, waji daboolashada ama daboolka wajiga.
- (b) Uu jiifo.
- (c) Uu si firfircoon u cunayo ama u cabayo.
- (d) Ka qeybgalo howl ku adkeyso xirashada maaskaraha, waji daboolida ama daboolka wajiga ma muuqdo, sida markii si firfircoon u dabaalanayo.
- (e) Uu ku jiro booska shaqada shaqsiga gaarka ah.
- (f) Waa inuu isaga saaraa si kooban maaskaraha, waji daboolashada ama daboolka wajiga sababtoo ah aqoonsiga shaqsiga ayaa u baahan in lagu xaqiijiyo muuqaalka wajiga, sida bangiga ama haddii dhaxgalayo fullinta sharciga.
- (g) Uu ku tababarayo ama ciyaarayo ciyaar tartan ah oo heer walba.
- (h) Garsoore ka ah ciyaar tartan ah ee uga baahan heer sare oo dadaal jiree sarkaalka.
- (i) Uu sameynayo, oo ay ku jiraan laakin kuma xadidno muusig dheelida, gaarsiinta qudbad dhageystayaasha, iyo masraha.
- (6) Sharuuda lagu xiranayo maaskaro waji daboolashada, waji daboolashada ama daboolka wajiga boos banaanka ah ma quseeyo xaaladaha xiggo, inkastoo dugsiyada iyo bixiyayaasha daryeelka carruurta laga filanayo inay sameeyaan dadaalo macquul ah ama ugu wanaagsan ee ku dhiiriyo ka fogaanshaha jireed ee boosaska banaanka:
- (a) Dugsiga inta lagu jiro saacadaha dugsiga joogtada ah.
- (b) Dugsiga markii shaqsiyaadka ay ka qeybihiin howlaha waxbarashada ama daryeelka carruurta ee ka baxsan saacadaha dugsiga caadiga ah.
- (c) Daryeelka carruurta diiwaangashan ama shahaadeysan sida kuwa lagu qeexay ORS 329A.250, ama bixiyayaasha daryeelka carruurta qoyska laga dhaafay sida mida lagu qeexay ORS 329A.430, inta lagu jiro saacadaha daryeelka carruurta ay shaqeyneyso.
- (d) Da'da dugsiga iyo barnaamijyada dugsiga horaan loo qoray sida kuwa lagu qeexay ORS 329A.250.
- (7) Qofka masuul ka ah booska gudaha waa inuu:
- (a) Hubiyaa in shaqaalaha, qandaraasleyaasha, iyo tabarucayaasha u hogaansmaan sharcigaan oo gudaha booska gudaha.
- (b) Samey dadaalo macquul ah ee lagu hubinayo in macaamiisha, martida, booqdayaasha iyo shaqsiyaadka kale inay u hogaansamaan sharcigaan ee booska gudaha.
- (c) Ku dhaji boorar albaab walba ee booska gudaha oo maaskarooyinka, waji daboolashada, ama daboolada wajiga loogu baahanyahay sida lagu qeexay sharcigaan.
- (8) Qofka masuulka ka ah booska banaanka waa inuu dhigaa aastaamaha albaab walba ee booska banaanka ee maaskarooyinka, waji daboolashada ama daboolada wajiga looga baahanyahay sida lagu qeexay sharcigaan.
- (9) Diyaariyaha dhacdada ama usugu imaanshaha booska banaanka waa inuu:
- (a) Hubiyaa in shaqaalaha, qandaraasleyaasha, iyo tabarucayaasha u hogaansqmaan sharcigaan inta lagu jiro dhacdada ama usu imaanshaha.
- (b) Ku dhaji boorar albaab walba ee dhacdada ama usu imaanshaha ee maaskarooyinka, waji daboolashada ama daboolada wajiga looga baahanyahay sida lagu qeexay sharcigaan, haddii aysan horaan u dhigin.
- (10) Ma jiraan wax ku jiro sharcigaan ee loogu talloagalay inay ka mamnuucdo badrooniga ama meesha hoyga dadweynaha inuu sameeyo hoyga macquulka ah si markaas ugu hogaansamo Xeerka Curyaanka Ameerikaanka (ADA), Ciwanaka VII ee Xeerka Xaquuqaha Rayidka, ORS 659.850 ama qodobada quseeyo ee ORS sadarka 659A.
- (11) Ciqaabaha: Qof walba eek u xadgudbaa qodob walba ee sharcigaan ayaa quseeyo ciqaabaha gaarayo illaa \$500 maalintiiba oo ku xadgudubkiiba ah.

**Maamulka Qaanuunka/Wax kale:** ORS 413.042, ORS 431A.010, ORS 431.110 & ORS 433.004  
**Qaanuunada/Wax kale ee La fulliyay:** ORS 431A.010, ORS 431.110 iyo ORS 433.004

**Helitaanka dukumiintiga:** Shakhsiyaadka naafada ah ama shakhsiyaadka ku hadla luuqad aan ka aheyn Ingiriis, OHA waxay ku bixin kartaa warbixinta qaabab kale oo dadban sida fasiraadaha, daabicida farta waaweyn, ama farta indhoolayaasha. Kala xiriir Xarunta Macluumaadka Caafimaadka 1-971-673-2411, 711 TTY ama [COVID19.LanguageAccess@dhsosha.state.or.us](mailto:COVID19.LanguageAccess@dhsosha.state.or.us).